



# Multi-Licensing (Liisamo Badan)

## Waa maxay nuqulka DCYF?

DCYF waxay doonaysaa inay adeegyada isku keento si dhamaan caruurga iyo dhalinyarta Washington ay ugu koraan si amaan ah oo caafimaad qabta, oo ay jidh ahaan, dareen ahaan iyo aqoon ahaanba u hormaraan, oo ay ugu noqdaan qoyska iyo bulshada.

## Waa maxay Liisamo Badan?

Liisamo badan waxaa weeye ansixinta cida liisanka haysta inay haysato wax ka badan hal liisan oo liisanka daryeelka guriga ka baxsan ah, sida, liisanka daryeelka korsashada guriga qoyska iyo hal ama wax ka badan oo liisan ama shahaadada liisamada daryeelka ilmaha.

Liisamada Badan waxay meesha ka saaraan carqalada, waxay fududaysaa in qoysasku ay ka shaqeeyaan daryeelka korsashada iyo bixiyaha daryeelka ilmaha. Qoysaska leh liisamada DCYF ee badan waxay bixin karaan daryeel wada socda oo joogto ah iyo taageerada caruurta iyo dhalinyarta.

## Siday u shaqaysaa?

- La xidhiidh sanduuqa Soo Dhawaynta DCYF ee [dcyf.welcome@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.welcome@dcyf.wa.gov) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan iyo ka shaqaynta liisanka.
- Kaalmada farsamo ee hore ee joogtada ah waxaa lagu heli karaa tobobarka adeega kahor iyo arjiga, ee liisanka iyo sugitaanka.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

- Ka eeg Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC) xogta ugu danbaya:
  - 110-148-1330: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-148-1330>
  - 110-300-0425: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0425>
  - 110-300-0430: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0430>
- Waxa aad haysan kartaa labada liisanka daryeelka korsashada ama daryeelka qaraabada ee bulshada iyo sidoo kale liisanka daryeelka ilmaha.
- Daryeelka Korsashada ee qoyska ee liisanka ka haysta Child Placing Agencies (Hay'ada Ilaalaya Ilmaha, CPAs) waxay leeyihiin ikhtiyaaro isku mid ah oo haysato liisamado badan ah.
- Cida liisanka haysata ee u qalanta waxay heli kartaa guditaanka lacagta daryeelka korsashada bishii iyo caydha kaabist ailmaha ee lacagta daryeelka ilmaha.
- Tirada ugu badan ee caruurga guriga liisanka haysta ee koristu waxaa weeye lix caruur ah oo jooga guriga liisanka haysta oo ay joogaan laba daryeelayaa; ama afar caruur ah liisanka guriga oo hal daryeelle joogo. Waxaa kamid ah carurtaada ka yar 18 jirka ah iyo carurta aad korsanayo ama daryeelka nasinta ah.
- Awooda daryeelka ugu badan waxa uu ku xidhan yahay cabirka meeshada, shaqaalah, waxbarashada iyo tobobarka, iyo xaalado kale.
- Liisan kastaa wuu madax banaan yahay. Cida liisanka haystaa waxay dooran kartaa inay xidho hal liisan oo uu mid kalena u furnaado.

## RABITAANKA? SU'AALO?

Kala xidhiidh DCYF [dcyf.welcome@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.welcome@dcyf.wa.gov)

DCYF ma takoorto waxayna usiisa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalasho ama soo geleyti, da'da, rabitaanka jinsiga ama aqoonsiga jinsiga, xaalada ciidanka hawlgabay ama ciidan, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka laxaad la'aan jidh, dareen, ama maskaxeed ama isticmaalka ayda ama xayaawaanka carbisan ee dadka hoga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimayka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION LIC\_0159 SM (10-2024) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**